

iyaga oo aan raalli ka aheyn awgood (bukaanka aan isqaybin), waxaa jira haya'do u dhisan iney dhawraan xuquuqda. Haya'dahani waa:

- Golaha Rasmiga ah ee Booqashooyinka
- Guddoonka Faaqidaadda caafimaadka
- Madaxa Xafiiska Takhtarka Dhimirka

Bukaanka aan isqaybin marka la dhigo isbitaalka waxaa la siiyaa qoraal faahfaahinaya xuquuqdooda iyo faahfaahin ku saabsan halka lagala xiriiri karo haya'dahan.

## SIDA AAD U KAALMEYN KARTO

Waxaa jira waxyaabo tiro badan oo bukaanku qaban karaan kuwaas oo isbitaalka ka caawinaya sidey u bixin lahaayeen daryeel kan ka fiican.

## AKHBAARTA LAGAAGA BAAHAN YAHAY INAAD BIXISO

- U sheeg shaqaalaha isbitaalka taariikhda caafimaadkaaga (iyo midka qoyskaaga), daweynta ama daawooyinka kuu socday inta aan lagu dhigin isbitaalka.
- U sheeg shaqaalaha isbitaalka wixii iska beddelay xaaladdaada ayna ka midka yihiin wixii dhibaato ah ee aad kala kulantay daweynta kuu socota
- U sheeg shaqaalaha haddii aad qabto baahi gaar ahaaneed
- Raac awaamiirta la socota daweynta, ama wargeli shaqaalaha isbitaalka haddii aadan dooneynin ama aadan sidaa yeeli karin

## TIXGELINTA SHAQAALAHA IYO BUKAANKA KALE

- Isku day inaad dhowrto ballamada isbitaalka. Haddii aad u baahan tahay inaad jebiso ballan la socodsii isbitaalka sida ugu dhaqsaha badan leh
- Tixgeli baahida bukaanka kale. Ixtiraam doorka iyo sharafta shaqaalaha isbitaalka iyo xuquuqda ay u leeyihiin goob shaqo oo ammaan ah farxadna leh
- Ka digtoonow in isbitaalaada dadweynaha ay leeyihiin door gaar ah oo ay ku tabaraan xirfadleyaasha caafimaadka. Haddii aad raalli ka tahay, waxaa laga yaabaa daweyntaada iney suurta geliso fursad lagu siiyo tababar noocaas ah

## WAR DHEERAAD AH

Haddii aad u baahan tahay war dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqda bukaanka guud ee isbitaallada Galbeedka Awstaraaliya waxaa la helaa buug aad helaa buug aad u faahfaahinaya. Fadlan weydii shaqaalaha isbitaalka sidaad ku heli laheyd nuqulka buugga ama haddii kale, (la xiriir) Laanta fulinta adeegyada ee Wasaaradda Caafimaadka ee:

189 Royal Street, East Perth 6004  
Telefoon: (08) 9222 4222

Haddii aad ka qabtid wax su'aal oo kale, fadlan la xidhiidh qaybta cusbataalka ee uu arinku khuseeyo. Magaalada Perth dhexdeeda, halka macluumaadka dhakhtarka lagala xidhiidhi karaa waa:

**Armadale Kelmscott Memorial Hospital**  
3056 Albany Highway, ARMADALE WA 6112  
Telephone: (08) 9391 2000

**Bentley Hospital**  
Mills Street, BENTLEY WA 6102  
Telephone: (08) 9334 3666

**Fremantle Hospital**  
Alma Street, FREMANTLE WA 6160  
Telephone: (08) 9431 3333

**Graylands Selby-Lemnos and Special Care Health Services**  
Brockway Road, MOUNT CLAREMONT WA 6010  
Telephone: (08) 9347 6600



**Joondalup Health Campus**  
*formerly Wanneroo Hospital*  
Shenton Avenue, JOONDALUP WA 6027  
Telephone: (08) 9400 9400

**Kalamunda District Community Hospital**  
Elizabeth Street, KALAMUNDA WA 6076  
Telephone: (08) 9293 2122

**King Edward Memorial Hospital for Women**  
374 Bagot Road, SUBIACO WA 6008  
Telephone: (08) 9340 2222

**Osborne Park Hospital**  
Osborne Place, STIRLING WA 6021  
Telephone: (08) 9346 8000

**Peel Health Campus** *formerly Mandurah Hospital*  
Lakes Road (cnr Murdoch Rd), MANDURAH WA 6210  
Telephone: (08) 9531 8000



SOMALI

Axdiga Isbitaalku Ugutala Galay  
Bukaanka Guud ee Galbeedka Awstaraaliya

# THE WESTERN AUSTRALIAN PUBLIC PATIENTS HOSPITAL CHARTER



**Princess Margaret Hospital for Children**  
Roberts Road, SUBIACO WA 6008  
Telephone: (08) 9340 8222

**Rockingham/Kwinana District Hospital**  
Elanora Drive, ROCKINGHAM WA 6168  
Telephone: (08) 9592 0600

**Rottneest Island Nursing Post**  
ROTTNEST WA 6161  
Telephone: (08) 9292 5030

**Royal Perth Hospital**  
Wellington Street, PERTH WA 6000  
Telephone: (08) 9224 2244

**Royal Perth Rehabilitation Hospital**  
Selby Street, SHENTON PARK WA 6008  
Telephone: (08) 9382 7171

**Sir Charles Gairdner Hospital**  
Hospital Avenue, NEDLANDS WA 6009  
Telephone: (08) 9346 3333

**Swan District Hospital**  
Eveline Road, MIDDLE SWAN WA 6056  
Telephone: (08) 9347 5244

*Macluumaadka intaas ka badan ee ku s aabsan dhakhtarka waxaa laga heli karaa*  
[www.health.wa.gov.au/services](http://www.health.wa.gov.au/services)



Department of Health  
Government of Western Australia

Produced in English and a number of community languages by the Department of Health 2002.  
Translated by Multicultural Access Unit 2002.

#4884A13 www.acomdesign.com.au

**BUKAAN GUUD AHAAN  
XUQUUQDA AAD KU LEEDHAY  
ISBITAALLADA GALBEEDKA  
AWSTARAALIYA**

## XUQUUQDA BUKAANKA GUUD

### KA ADEEGASHADA ADEEGYADA CAAFIMAADKA

#### 1. Ma dooran karaa inaan helo adeegyada ay bixiyaan isbitaalada dadweynaha si bukaan gaar ahaaneed ah amaba bukaan guud oo bilaash ah?

Dadka deggan Awstaraaliya iyo martida ka soo booqata waddamada qaarkood waxay xaq u leeyihiin in la siiyo akhtiyaar ay ku heli karaan adeegyada caafimaadka guud si bukaan gaar ahaaneed ah amaba bukaan guud oo bilaash ah.

#### 2. Ma heli doonaase adeegyada aan u baahnahay haddii aan doorto inaad ahaado bukaan guud?

Bukaan guud ama mid gaar ah ahaatayaaba waxaad xaq u leedahay in lagu siiyo adeegyo tayo leh oo ku saleysan baahidaada caafimaad.

#### 3. Ma la ii daweyn doonaa si xushmeyn iyo tixgelin mudan haddii aan doorto inaan ahaado bukaan guud?

Bukaanka oo idil waxay xaq u leeyihiin in loo daweyno si ixtiraam, sharaf iyo tixgelin mudan xagga baahidooda gaar-kaa iyo qof ahaaneedba.

#### 4. Ma heli doonaase adeegyada aan u baahnahay haddii aan ku noolahay meel miyi ah?

Waxaad xaq u leedahay inaad ka adeegato adeegyada aasaasiga ah ee kala duwan oo laga bixiyo isbitaalada meel kasta oo aad kaga nooshahay Awstaraaliya. Haddii adeegyada aad u baahan tahay aan laga heli karin meesha aad deggan tahay waxaa lagu dirayaa xarun adeegyadaa laga helo.

### WAR KU SAABSAN DARYEELKA CAAFIMAADKA (AGA)

#### 5. Ma la ii qeexayaa daweynta ka hor inta aanan oggolaanin mase diidi karaa in ley daweyno?

Ka hor inta aadan daweynta oggolaanin waxaad xaq u leedahay in si cad oo aad garan garto laguugu qeexo daweynta laguugu tala galay, wixii halis ah oo ka imaan kara iyo beddelkoodaba. Haddii aadan garaneynin afka Ingiriiska waxaad weydiisan kartaa qof kuu afceliya.

Waxaad xaq u leedahay inaad ka qeyb qaadata go'aminta ku saabsan daryeelka caafimaadkaaga iyo inaad diiddo daweynta.

#### 6. Ma doonan karaa ra'yi-caafimaad labaad?

Galbeedka Awstaraaliya bukaan ka oo idil waxay xaq u leeyihiin iney doonaan ra'yi-caafimaad labaad. Halkey ka suurtoodana maamulka isbitaalka ayaa kaa taageeri doona si aad u hesho ra'yi-caafimaad labaad, taasoo ku xiran jirradaada, halka aad deggan tahay iyo helitaanka takhaatiir kale.

#### 7. Shaqaalaha isbitaalka miyey igala xaafoon doonaan daryeelka caafimaadkeyga joogtada ah inta aanan ka bixin isbitaalka?

Waxaad xaq u leedahay in war lagaa siiyo wixii ku saabsan daryeelka caafimaadkaaga joogtada inta aadan ka bixin isbitaalka.

#### 8. Ma arki kara akhbaar ku saabsan diiwaankeyga caafimaad ee uu isbitaalku iga hayo? Mase loo bandhigi karaa qof kale?

Waxaad xaq u leedahay inaad aragto wixii war ah ee ku saabsan diiwaankeyga caafimaadkaaga haddii ay waafaqsan tahay sharciga, iyo haddii warkaaga gaar ahaaneed uu sir yahay.

### OGGOLAANSHAHA KA QEYB QAADASHADA TABABARKA IYO CILMI BAARISTA

#### 9. Miyaa la iiga baahan yahay inaan ka qeyb qaato tababar cilmi baaris caafimaad?

Waxaad xaq u leedahay inaad oggolaato ama diiddo ka qeyb qaadashada tababarka xirfadleyaasha caafimaadka iyo cilmi baarista caafimaadka.

### HABKA ASHTAKADA

#### 10. Ma ashtakoon karaa haddii aanan ku faraxsaneyn daweynta ley fidiyey?

Waxaad xaq u leedahay inaad talo ka dhiibato ama ka ashtakooto daryeelka caafimaad ee aad hesho iyo in lagu siiyo war ku saabsan sidaad u ashtakoon laheyd.

## AXDIGA BUKAANKA GUUD

Haddii aad tahay bukaan guud oo ku jira ibitaal dadweyne oo ku yaalla Galbeedka Awstaraaliya waxaad xaq u leedahay:

- Adeegyada isbitaalka dadweynaha oo bilaash ah
- Daweynta aad u baahan tahay
- In lagu daweyno si xushmad iyo sharaf mudan
- Inaad ka adeegato adeegyada laga bixiyo gobolka oo dhan
- In lagu qeexo daweynta iyo inaad raalli ka tahay ka hor intaan lagu daweynin
- Inaad doonato ra'yi 2aad ee cafimad
- In lagu siiyo talo ku saabsan daryeelkaaga kolkaad ka baxeyso isbitaalka
- Inaad aragto diiwaankeyga caafimaadka iyo wixii sir ah ee ku jira
- In la helo oggolaanshahaaga ka hor inta aadan lug ku yeelan tababar iyo cilmi baaris
- Hab sahlan oo aad ku ashtakoon karto

## SIDA LOO ASHTAKOODO

Haddii aad dooneyso inaad talo ka dhiibato ama ka ashtakooto adeeg lagaa siiyey isbitaal ku yaalla Galbeedka Awstaraaliya adigoo bukaan guud ah, waa inaad marka hore wargelisaa shaqaalaha isbitaal wixii walaac ah ee aad qabto. Wargelintan waa mid loo baahan yahay in la sameeyo sida ugu dhaqsaha badan leh.

Haddii kale, waxaad la xiriiri kartaa isbitaal ama maamulka adeegga caafimaadka, adigoo siinaya faahfaahinta ashtakadaada. Waxaa kale oo kuu bannaan inaad la xiriirto Xafiiska Faaqidaadda Caafimaadka.

Xafiiska Faaqidaadda Caafimaadka waxaad kala xiriiri kartaa:

17th floor, St Martins Tower  
44 St Georges Terrace, Perth

GPO Box B61  
PERTH WA 6838

Telefoon bilaash ah: 1800 813 583  
Telefoon: (08) 9323 0600  
Facsimile: (08) 9221 3675

## CAAFIMAADKA BUKAANKA DHIMIRKA

Bukaanka dhimirkoodu dhimman yahay ee isqaybay waxay xaq u leeyihiin xuquuq la mid ah kuwo loo oggolyahay bukaan kale ee guud.

Hase ahaatee, marxaladaha gaarka ah ee la xiriira bukaan dhimirkoodu dhimman yahay oo la xiray